

2023-11-15

Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb Waxay doonayaan Xubnaha Guddiga Hantidhowrka ee 2024

(Stone Mountain, GA) – Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb ayaa hadda aqbalaya codsiyada Guddigooda Hantidhowrka 2024. Guddigaan muhiimka ah ayaa kormeera howlgalada maaliyada Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb, iyadoo hubinaya daahfurnaanta iyo maareynta maaliyada wax ku ool ah.

Xubnaha guddiga waxay la shaqeynayaan Xafiiska degmada ee Hantidhowrka Gudaha iyo U hogaansanaanta, iyadoo door muhiim ah ka qaadanaya dib u eegista nidaamyada warbixinta maaliyada, xisaab hubinta, xakameynada gudaha, iyo u hogaansanaanta sharciyada iyo xeerarka quseeya. Doorkaan ayaa muhiim u ah wax ka qabaqashada qiyaano walboo imaan karta, qasaarin, iyo arrimaha xadgudubka, si loo ilaaliyo daacadnimada maaliyadeed ee degmada.

Musharixiinta ku haboon waa inay lahaadaan qibrada maareynta, maaliyada, xisaabaadka, ama xisaab hubinta ama ay leeyihiin qibrad kale oo la xiriirta oo gacan ka geysaneyso ujeedooyinka guddiga. Guddiga Waxbarashada waxay raadinayaan shaqsiyaadka ay ka go'antahay inay illaaliyaan masuuliyada maaliyada ugu sareysa iyo heerarka adeega bulshada.

Magacaabista guddiga ayaa ah muddo hal sanno ah, iyadoo ay suurtagal tahay in dib loo soo doorto illaa labo xilli oo dheeraad ah. Dagayaasha Gobolka DeKalb ee xiiseynaya inay u adeegaan sida La taliyayaasha Bulshada ee Gudida Hantidhowrka waa inay ku soo gudbiyaan siifiigooda, warqada xiiseynta, iyo codsiga communityadvisor@dekalbschoolsga.org xiliga Diseembar 13, 2023, saacada 5 p.m.

Guddiga Waxbarashada ayaa dib u eegayo codsiyada gudaha Diseembar oo waxay dooranayaan labo illaa sadex lataliyayaal bulsho oo aan codeyn laheyn iyadoo loo marayo cod aqlabiyad ah gudaha Janaayo.

Hindisahaan wuxuu ka tarjumayaa sida ay uga go'an tahay Guddiga daahfurnaanta maaliyada iyo ka qeybgelinta bulshada ee maamulka waxbarashada. Wixii warbixin dheeraad ah ama si aad u aragtid Xeerka Guddiga BBC oo dhameystiran: Guddiyada Guddiga, riix [HALKAAN](#).